



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/1005/2022

TR. 28/09/2022

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO IYO WAKAALAD GUUD

Maanta oo ay taariikhdu tahay 28/09/2022, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-Daahir Rooble Diiriye, Somali ah, Ku Dhashay Kismaayo, Sanadkii 1961, Ina Ceynabo Jimcaale Xalane, sita Kaarka Aqoonsiga No.18698.

2-Daahir Yuusuf C/qaadir, Somali ah, Ku Dhashay Gaalkacyo, Sanadkii 1976, Ina Xaawo Cali Jimcaale, sita Warqada Sugnaanta Lr.225738.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray **Saciid Muuse Warsame Waadhowr**, kuna geeriyooday **Nairobi-Kenya** Sanadkii: **2021**, labadiisa waalidna way ka geeri Horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya **1- Xaas, 3- Wiil iyo 1- Gabar**, Waxayna kala yihiin sidan soo socota: -

DADKA:-

1-Siraad	Axmed	Cali	Degan Xamar	Dhalatay 1968	(Xaaskii Marxuumka)
2-Mustafa	Saciid	Muuse	Degan Xamar	Dhashay 1990	(Wiilkii Marxuumka)
3-Bilaal	Saciid	Muuse	Degan Xamar	Dhashay 1996	(Wiilkii Marxuumka)
4-C/qaadir	Saciid	Muuse	Degan Xamar	Dhashay 1998	(Wiilkii Marxuumka)
5-Muna	Saciid	Muuse	Degan Xamar	Dhalatay 1988	(Gabadhii Marxuumka)

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **Marxuum Saciid Muuse Warsame Waadhowr** uu ifka uga tagay guri Jiingad ah oo ku yaalla **Muqdisho** Degmada **Kaaraan**, Cabirkiisuna yahay **(20X15)-M, Lotto No: 3939-X**, Lehna W.M.L 49115/2013, Tr. 26/05/2013, kana soo baxday Nootaayo Muqdisho, una saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble, iyo sidoo kale saamiga uu ku leeyahay dhammaan Hantida dhaxalka uu ka dhaxlay Hooyadiis Marxuumad Culumo Cawaale Jaamac.

WAKAALAD.


- Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In dhaxaltooyada kala ah **1-Siraad Axmed Cali, 2- Mustafa Saciid Muuse, 3-Bilaal Saciid Muuse, 4- C/qaadir Saciid Muuse, 5-Muna Saciid Muuse**, ay soo wada wakiisheen **C/qaadir Axmed Kadiye**, sida ku cad Warqad Wakaalad Guud (Qeyb dhaxaleed) Rep No: 76848/MPN/2021, Tr. 03/04/2021, kana soo baxday Nootaayo Muqdisho, uuna saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble, una soo wakiisheen **C/qaadir Axmed Kadiye**, in uu u maamuli Karo, dhaxalkoob u samayn Karo, xafidi Karo, gadi Karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, waqfi karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, dhisi Karo, kireyn Karo, ka saari Karo, Saxiixi Karo kaalintooda, una doodi Karo una dacwoon Karo oo qareen u qaban Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karo qismiga uu ku leeyihiin dhammaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **Marxuum Saciid Muuse Warsame Waadhowr**.

Bogg: 1/2



MASAWIRKA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA

C/QAADIR AXMED KADIYE



MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

1)- DAAHIR ROOBLE DIIRIYE



2)- DAAHIR YUUSUF C/QAADIR




DAMIINU MAAL


- Daahir Rooble Diiriye & Daahir Yuusuf C/qaadir, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Dhaxaltooyadi dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaalada Sare Ku Xusan Soo diray.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- DAAHIR ROOBLE DIIRIYE



2- DAAHIR YUUSUF C/QAADIR



SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA

C/QAADIR AXMED KADIYE



SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay Dukumintiga guriga uu Marxuumku ku qoran yahay, markay aragtay wakaalada sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugaysaa geerida **Marxuum Saciid Muuse Warsame Waadhowr**, oo ay Dhaxalkiisu leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa in Dhammaan Dhaxaltooyada Marxuumka ay soo wada wakiisheen **C/qaadir Axmed Kadiye**, waana sugitaan dhaxalkoob, Cadeyn Tariko iyo Wakaalad Guud oo ansax ah oo waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali



Bogg: 2/2

DOWLADDA HOOSE
EE MUQDISHO



MUNICIPALITY
OF MOGADISHU

KAARKA AQQONSIGA

18598

Magaca..... DAAHIR
Aabaha..... ROOBLE
Awowga..... DIIRIYE
Naynaas..... MA
Goobta.....
Dhalashada.....
Sanadka.....
Jinsiyada..... SOOMAALI



Shaqada..... GANACSADE

Astaan Gaar: MALAHAN

Hooyada: CEYNABO JIMCALE XALANE

Dheerarka: 1.7

Taariikhda Labixi

17-Mar-2018 12:00:00 AM

Duqa Magaalada



Ahmed Ali

Aqoonsigan waxaa ogolaatay Dowladda Hoose ee Muqdisho. Qofkii hela
aqoonsigaan, fadlan guddoonsii xafiisyada Dowladda Hoose ee Muqdisho
kan kuugu dhow.

373696



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA
HOOS KU TILMAAMAN UU VAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN
(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details.)

MAGACA Full Name	DABIR YUSUF ABDULKADIR
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	01-Jan-1976
GOBTA DHALASHADA Place of Birth	GALKAIO
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	225738
JINSI Gender	Male
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Warta
MAGACA HOOTADA Mother's full Name	HAWA ALI JIMALE
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	12-Oct-20
SHAQADA Occupation	LABOURER



Right Thumb Print



Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed

(Handwritten signature)

